# HESHIISKA LABADA DHINAC EE MAXKAMADDA ISKA SAARIDA GURIGA

Inta badan kiisaska mulkiilaha-ijaartaha waxaa la xalliyaa maxkamad la'aan. Halkii maxkamad la isa soo taagi lahaa, mulkiilayaasha guryaha iyo ijaartayaashu waxay inta badan ku heshiiyaan wax xalllin labo dhinac ah ama heshiis laba dhinac ah. "Stipulated" wuxuu macnaheedu yahay in labada dhinacba ku heshiiyaan qoddobo, iyada oo uusan qareen ku lug yeelan ama sameynta go'aan gaarid ku saabsan sharciga ama xaqiiqooyinka. Waxaa jira faa'iidooyin iyo faa'iido darro ay u leeyihiin ijaartayaasha saxiixa noocyadani heshiis.
Maskaxda ku hay, haddii aad saxiixdo heshiis laba dhinac ah, waxaa dhici karta in aad ka tanaasulayso xuquuqaha sharci oo muhiim ah.

## FAA'IIDOOYINKA:

- Waa degdeg: Kiiska waxaa la xalliyaa isla markiina, maxkamad la'aan.
- Haddii aad awoodo in aad heshiiska u raacdo ***si sax ah***, kiiska meesha ayaa laga saari doonaa mana jiri doono xukunka iska saarida guriga oo ku qoran diiwaankaaga. (Haddii heshiiskaagu uusan si gaar ah u sheegin goorta kiiska meesha laga saari doono, waxaa meesha lagaga saari doonaa muddo hal sano ah.)
- Iyada oo ku xiran heshiiska, waxaa dhici karta in aad sii joogto gurigaaga, ama hesho waqti dheeraad ah oo aad ku guurto oo ka badan haddii aad maxkamad aadi lahayd oo lumin lahayd.
- Iyada oo ku xiran heshiiska, waxaa dhici karta in aad awoodo in aad iska ilaaliso bixinta kharashka maxkamadda ee mulkiilaha guriga ama kharashka qareenka.

## FAA'IIDO DARRADA:

- Foomamka heshiisyada qaarkood waxay sheegayaan in aad "iska dhaafto" (oo ka dhigan in aad ka tanaasusho weligaa) wixii xuquuqo ah ee kale ee aad ku dacwayn karto mulkiilahaaga guriga. Waa in aad si adag uga fikirtaa diidmada in aad saxiixdo heshiis ka kooban hadalka wax iska dhaafida. Waxaad ka codsan kartaa mulkiilaha guriga in uu ka saaro qaybtaasi heshiiska.
- Waxaad luminaysaa fursada aad ku aadayso maxkamad. Wixii sheegashooyin ee kale ama difaacyo ah ee ay dhici karto in aad leedahay ee ku aadan iska saarida guriga waa la lumin doonaa. Macno yeelan mayso haddii uu jiray dhibaato dhanka sharciga ah oo lala lahaa iska saarida guriga. Haddii aad gasho heshiis laba dhinac ah, waxaad luminaysaa xuquuqdaada aad u leedahay in aad diido kiiska iska saarida ee mulkiilaha guriga.
- Haddii aadan oggolaanin taariikh gaar ah oo kiiskaaga meesha looga saaro, waxaa dhici karta in uu ku sii joro diiwaankaaga muddo hal sano ah.
- Waa in aad heshiiska u raacdaa si sax ah sida uu u qoran yahay. Haddii aadan raacin heshiiska, mulkiilaha gurigu wuxuu guriga kaaga saari karaa si degdeg ah, iyada oo aysan jirin xuquuq loo leeyahay maxkamad. Xataa xadgudubka yar wuxuu keeni karaa iska saarida guriga.

- Inkasta oo aad codsan karto dacwad dhageysi haddii mulkiilaha gurigi sheego in aadan raacin heshiiska, arrimaha kaliya ee qareenku wax ka weydiin doonaa waa:
    - ma raacday heshiiska
    - mulkiilaha gurigu ma kaa hor istaagay in aad raacdo heshiiska
    - adiga ama mulkiilaha gurigu ma badasheen heshiiska
    - heshiisku miyaa loo galay si niyad wanaagsan leh
    - heshiiska miyuu asal ahaan ahaa mid cadaalad darro ah
    - dhab ahaantii ma lagugu lahaa ijaar yimid waqtigii la bixin lahaa ka dib marka aad sameysay heshiiska

## MA IN AAN SAXIIXAA HESHIISKA?

Adiga ayay ku jirtaa in aad oggolaato in aad gasho heshiis laba dhinac ah. Heshiisyadu waxay ku siin karaan waqti waqti dheeraad ah oo aad ku guurto, waxay ka hortaggi karaan iska saarida guriga ee galaysa diiwaankaaga, waxayna mararka qaarkood kuu saamaxaysaa in aad sii haysato gurigaaga. Laakiin waxaad ka tanaasulaysaa xuquuqo dhanka sharciga oo badan marka aad saxiixdo gasho heshiis laba dhinac ah. Waa in aad naftaada weydiisaa:

- Qoddobada heshiiskani ma yihiin kuwo macquul ah? Miyaan dhab ahaantii bixin karaa lacagta aan oggolaanayo in aan bixiyo? Miyaan dhab ahaantii guuri karaa waqtiga aan oggolaanayo in aan guuro?
- Miyuu mulkiilaha guriga isla markiiba meesha uga saari doonaa kiiska, ama miyuu ku jiri doonaa diiwaankayga muddo sanad ah?
- Sidee bay u badan in ay tahay in aan ugu guuleysani doono maxkamad? Ma jiraan dhibaatooyin dhanka sharciga ah oo lagu qabo ogeysiinta iska joojinta ijaarka? Ma leeyahay wax sheegashooyin ah?
- Miyay suurtagal tahay in aan heli karo qareen igu matala kiis maxkamaddeed? (Haddii aad tagto maxkamad oo aad lumiso, waxaa lagaa codsan karaa in aad mulkiilahaaga guriga siiso kharashka dhanka dharciga ah.)
- Heshiisku ma wuxuu sheegayaa in aan ka tanaasulo dhammaan sheegashooyinka kale ee aan qabo ee ka dhanka ah mulkiilaha guriga? (Haddii ay sidaasi tahay, waa in aad ka fikirtaa in aad ka codsato mulkiilaha guriga in uu meesha ka saro qaybtaasi heshiiska.

## OGEYSIINTA U HOGGAANSANAAN LAHAANTA

Haddii aad horeba u saxiixday heshiis laba dhinac ah, oo mulkiilaha guriguna wax u gudbiyay maxkamadda oo sheegaysa in aadan u hoggaansamin iyada, waxaa jiri doona xukunka iska saarida guriga oo la galiyay oo kaa dhan ah. Ka dib mulkiilaha gurigu wuxuu awoodi doonaa in uu weydiisto maxkamadda ammar lagaga dhigayo mas'uulka 'sheriff' in uu yimaado sii uu guriga kaaga saaro maalmo dhowr ah. Marka mulkiilaha gurigu uu gudbiyo ogeysiinta u hoggaansanaan lahaanta, waxaad haysataa oo kaliya waxyaabo dhowr ah oo kuu bannaan:

- In aad tagto maxkamadda oo gudbiso ogeysiin lagu codsanayo dacwad dhageysi. Waxaa taariikhda dacwad dhageysiga lagugu siin doonaa maalin ama laba. Marka la joogo dacwad dhageysiga, waxaad u baahnaan doontaa in aad ku qanciso qareenka in aad dhab ahaantii u hoggaansantay heshiiska, ama ay jirtay sabab fiican oo aadan u sameyn. Waxaa jira waxyaabo dhowr ah oo maxkamaddu tixgelin doonto:

- ma raacday heshiiska
- mulkiilaha gurigu ma kaa hor istaagay in aad raacdo heshiiska
- adiga ama mulkiilaha gurigu ma badasheen heshiiska
- heshiisku miyaa loo galay si niyad wanaagsan leh
- heshiiska miyuu asal ahaan ahaa mid cadaalad darro ah
- dhab ahaantii ma lagugu lahaa ijaar yimid waqtigii la bixin lahaa ka dib marka aad sameysay heshiiska

- La xiriir mulkiilaha guriga ama qareenkiisa oo ka codso in ay meesha ka saaraan iska saarida guriga haddii aad guurto. Ka dibna isla markiiba guur.
- Haddii ay jirto sabab la xiriirta naafanimo oo ah sababta aadan ugu hoggaansamin heshiiska, ka codso mulkiilaha guriga ama qareenkiisa qorshe sii dejin macquul ah. Kani waa ka mid ah heshiis cusub, ama waqti dheeraad ah oo lagu guuro.

Nasiib darro, marka heshiiska la saxiixo, ma jiraan wax badan oo aad qaban karto si aad u beddesho iyada. Waa in aad raacdaa iyada ama gashaa halis ah xukunka iska saarida oo kaa dhan ah.